



Berito (Arbaco, Febraayo 17): Dhismayaasha PPS Waa Furan Yihiin, Waxbarashadii Ardaydu Guryaha Ku Qaadanayeen & Addeegyadii Cuntaduba Waa La Soo Celiyey

Febraayo 16, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ee PPS,

Dhismayaasha PPS waa furnaan doonaan iyada oo Waxbarashadii online-ka ahayd ee Ardaydu Guryaha Ku Qaadanayeen ay sii socon doontaa berito oo Arbaca ah, Febraayo 17, 2021.

[Addeegii cuntada](#) waa soo laaban doonaa; sidaas darteed, fadlan waxaad ogataa **berito waxaa la bixin doonaa addeegyo cunto oo kooban:**

- Addeegii cuntada ardayda loogu geyn jiray guryaha waxa uu guryaha gaari doonaa qiyaas ah 2 saacadood ka dib waqtigii caadiga ahaa ee uu hore guryaha u soo gaadhi jiray.
- Goobaha soo socda ee addeegyada cuntada laga bixin jiray berito waa xirnaan doonaan sababtoo ah korontada oo ka maqan awgeed. Fadlan waxaad qoresheysaan in aad cuntada u raadsataan goobaha badiilka ah kuwaasi oo ku hor qoran liistada goobaha la xiray:
 - Arleta waa xiran tahay goobtii cuntada laga qeybinayey (goobta badiilka ee ugu dhow waa goobta: Marysville)
 - Bridger waa xiran tahay goobtii cuntada laga qeybinayey (goobta badiilka ah ee ugu dhow waa : Harrison Park)
 - Whitman waa xiran tahay goobtii cuntada laga qeybinayey (goobta badiilka ee ugu dhow waa : Lane)
 - Woodmere waa xiran tahay goobtii cuntada laga qeybinayey (goota badiilka ah ee ugu dhow waa : Kelly)

Waxbarashadii ardayda la siinayey ee koobneyd (LIPi) waa ay sii socon doontaa berito oo Arbaca ah. Haddii ay timaado dhibaato dhinaca korontada ah, iskuuladu waxay si toos ah ula soo xiriiri doonaan qoysaska ay soo waajahday koronto la'aantu.

Daryeelkii caruurta ee goobaha PPS laga bixin jiray waa la soo celiyey berito oo Arbaca ah. Haddii ay timaado dhibaato dhinaca korontada ah, waxaa si toos ah idiinla soo xiriir doono daryeel bixiyaasha daryeelka xannaanda caruurta.

Ardayda dugsiyada sarre tababaradoodii ciyaaraha ee qorsheysnaa waxa ay uga qeybqaadan doonaan sidii caadiga ahayd iyada oo macluumaad dheeraad ah ka heli doontaan agaasimaha tababarada ciyaaraha/ama tababaradooda maalinta Arbacada.

Waxa aanu ognahay in qoysaska iyo shaqaalaha qaarkood ay soo waajahday koronto la'aan iyo/ama internet la'aan. Marka la eego xaaladahaasi, maqnaanshaha ay ardaydu ka maqan yihiin

iskuulka waa loo cudur daari doonaa. Macallimiinta ay soo wajahday koronto la'aanta ama internet-ka oo ka maqan guryahooda waa in la kala xaajoodaan maamulhooaha sidii ay u qorsheyn lahaayeen maalintaasi.

Waad mahadsan tihiiin fadlan waxaan idiin rajeyneynaa inaad ku waartaan nabadgalyo.